

# 3 Dariiqo oo lagu hagaajinayo Hawada Gudaha Dhismayaasha iyo Yaraynta Khatarta Faafitaanka caabuqa COVID-19


Nadiifinta hawada gudaha dhismayaasha waa mid ka mid ah hababka ugu wanaagsan ee lagu yareyn karo faafitaanka COVID-19 ee gudaha dhisme ka dhaca.

Xeeladahan soo socda ayaa kaa caawin doona nadiifinta hawada gudaha dhismaha xaruntaada:

## 1. KORDHI QULQULKA HAWADA


*Sideen ayaa kusoo galini karaa hawada bannaanka meelaha gudaha dhismaha ah?*

- Fur dariishadaha iyo albaabbada si loo kordhiyo qulqulka hawada dibadda inay soo gasho dhismaha.
- Kordhi qadarka hawada bannaanka ee lagu soo jiido iyada la adeegsanaya nidaamka kuleylka, Hawo-qaadista, iyo qaboojinta (HVAC) ilaa 100%.



## 2. NADIIFI HAWADA GUDAHADHISMAHA

*Sideen uga saari karaa wasakhda hawada gudaha dhismaha?*


- 
- Ku dar sifeeyaha hawada gudaha dhismaha adoo hagaajinaya nidaamkaaga HVAC ama adoo ku daraya qalabka nadiifinta hawada ee HEPA ee la qaadan karo:
  - Nidaamkaaga HVAC ha la qiimeeyo si loo go'aamiyo haddii ay wax ka qaban karto sifeeyayaasha waxtarka sare leh (oo lagu qiimeeyay MERV 13 ama wax ka sareeya). Ku rakib sifeeyayaasha haddii ay suurogal tahay.
  - Adeegso nadiifyeyaasha hawada ee HEPA ee la qaadan karo oo bixiya 99% ama waxtarka sifeynta sareeya ee ka hooseysa illaa 0.3 microns.
  - Iisticmaal marawaxadda sanduuqa leh sifeeyaha kulayl-dhaliyaha ah ee MERV 13 ee kaga dheggan dhabarka. Tani waa fursad qiimo jaban.

## 3. KU DILJEERMISKA HAWADA ADOO ISTICMAALAYA RAADHIYEETARKA

### IFTIINKA QOLKA KORE EE JEERMISKA DILA (UVGI)

*Nidaamyada UVGI waxay hawl gab ka dhigi karaan jeermiska hawada laakiin kama saari karaan wasakhda. UVGI waxay noqon kartaa mid waxtar u leh hawo qaadashada iyo sifeynta hawada si loo hagaajiyoo hawada gudaha dhismaha xaaladaha qaarkood.*

- Haddii ay ku habboon tahay goobtaada, **kala shaqee khabiir takhasus leh rakibidda nidaamyada UVGI.**



La tasho maamulaha dhismahaaga ama khabuurkaaga HVAC si aad ugala hadasho xeeladaha sida ugu fiican ugu shaqeyn doona xaruntaada.

Wixii maclumaaad faahfaahsan oo ku saabsan seddexdan istiraatiiyadood iyo si aad u barato sida loo aqoonsado tiknoolajiyada si looga fogaado, fadlan ka fiiri [www.kingcounty.gov/covid/air](http://www.kingcounty.gov/covid/air).

(Websaydhka waxaa ku qoran luuqada Ingiriisiga kaliya)

Abril 15, 2021